



## **Jadwalka-Caruurta ee barnamijka Tieto Edu, loogu talo galay cida ka masuulka ah ilmaha dhigta iskuulka iyo Fritidshem ka.**

Cida ka masuulka ah ilmaha yar oo dhigta iskuulkag dagiska ama fritidshem ka waxa uu ku reebayaa jadwalka wakhtiga ilmaha yar barnaamijka Tieto Edu. Jawadwalka waxaad halkaas galinaysaa mudo ka hor.

Hadii aad jadwalka wax ka badasho waa in aad mid cusub galisaa meesha ugu yaraan muddo hal usbuuc ka hor ah, suurto-gal maaha in aad galiso jadwalka isla wakhtiga go'aanka laga gaadhayo. Macluumaadka muhiimka ah ee jadwalka ilmaha yar lagu qorayaa waa wakhtiyada qofka masuulka ahi uu shaqaynayo, wax baranayo iyo wakhtiga safarka ee meelahaas u ku tagayo. Halkan eeg oo ka arkhri waxbixin dheerad ah sharciga iyo waxa lagaa rabo [www.kristianstad.se/barnschema](http://www.kristianstad.se/barnschema).

Waa muhiim in shaqaalahu ay ka hayaan waxbixin ilmaaha wakhtigiisa uu joogo iskuulka ka iyo Fritidshem kaba. Wixii ka badan 15 saacadood usbuucii waxa go'aan ka gaadhaya maamulaha iskuulka marka laga hadlayo guud ahaan iskuulka 3-5 sanno jirka iyo caruurta waalidkood uu ku jiro fasaxa waalidnimada ee ilmo kale.

### **Jadwalka-caruurta ku soo gudbi halkan wakhtiyada dhabta ah.**

#### **Diwaan-gali jadwalka**

Markaad gasho barnamijka Tieto Edu waxaad ka dooranaysaa jadwalka-caruurta (Jadwalka-ilmaha) isla markaana waxaad diwaan galinaysaa jadwalka iyo wakhtiyada usbuuc kasta. Waxa saarmaysa calaamad cagaaran hadii wakhtiga usbuucaas aad diwaan galisay. Usbuucyada aan lahayn calaamada waxa ka maqan jadwalkii waana muhiim in aad galiso jadwalka dhabta ah. Hadii uu ilmuhu yahay fasax maalin waad ka boodaysaa maalintaas hadii ilmaha yar uu fasax yahay usbuuc dhan waxaad galinaysaa calaamad muujinaysa in uu fasax yahay usbuuca oo dhan.

Waa muhiin in aad diwaan-galiso jadwalka markaas taagan. Hadii aad haysato jadwal hal usbuuc oo kali ah, taas oo wakhtiyadu isku wada mid yihiin iyada uun ku celceli (koobiye)



adiga oo dooranaya kolba usbuuca markaas taagan. Ama dooro dhamaan usbuucyada la heli karo kuwaas oo ah muddo afar bilood ah markiiba. Waa muhiin in aanu jadwalku maqnaanin kana sii fikir hadii uu isbadal yimaado in aad wakhti hore ugu yaraan hal usbuuc ka hor aad sii diwaan galiso. Markaad dhaymayso waxaad tabanaysaa badhanka waan aqbalay (bekräfta/waan aqbalay).

Hadii ay wax iska badalaan wakhtiyadii aad hore u diwaan galisay waad ku noqonaysaa jadwalka kadibna waxaad badalaysaa wakhtiyadii adiga oo fasax calaaminaya kadibna sas ku diraya.

Marka aad badelayso usbuucyada jadwalka waxaad galaysaa meel aad ka badeli karato, halkaas oo ay suurto gal kuu tahay in aad jadwalka u koobiyeeyso walaalada ama caruuta kale una dirto. Hadii ay yihin caruurta iskuulka dhigata hadaba eeg ilmaha aad jadwalkiisa hayso, si aanay wakhtiyada iskuulku u raacin jadwalka. Si aad ugu darto wakhtiyada subaxii iyo galinka danbe waxaad taabataa calmaada isku gaynta ah taas oo kuu furaysa meel aad ku qori karto wakhtiyada.

Caruurta walidkood ama cida ka masuulka ahi hadii ay dagan yihiin adrays kala duwan, markaas mid walba waxa uu soo dirayaa jadwalkiisa oo gaar ah. Lama galinayo labada jadwal midna ilaa uu sistamku isku daro labada waalid jadwalkooda oo uu mid iskaga dhigo uu ilamaha yar leeyahay.

### **Muqaal-guud**

Halkan waxaad ka arki kartaa jadwalkaaga iyo wakhtiyadii aad diwaan-galisay (Wakhtiyada la qorsheeyay) iyo wakhtiga uu ilmuhu joogay iskuulka ama fritidshem ka (wakhtiga dhabta ah). Waxaad u arki kartaa muqaalka jadwalka bisha dhan ama maalin kasta.

### **Qofka ilamaha soo kaxaynaya**

Waa muhiin in aad diwaan galiso qofka ilamahaaga xaq u leh in uu iskuulka geeyo kana soo kaxeeyo. Warbixintaas waxa haynaya shaqaalaha iskuulka ama fritidshem ka.

### **Xasuusin waxa maqan jadwalkii**

Hadii aanad diwaan-galin jadwalka wakhtiyadiiisa ama fasaxaba muddo hal usbuuc ah, waxa lagu soo dirayaa xasuusin in jadwalkii maqan yahay. Fariintan waxa lugugu soo



dirayaa barnaamijka Tieto Edu waxaanad ku shuban kartaa telefonka gacanta, ogaysiis baana kusoo dhici doona.

Muhiimada caruurta jadawalkoodu waa waalidka wakhtiyada uu shaqaynayo, waxa dhiganayo ama uu safarka ku jiro maalintii halkan eeg macluamad dheerad ah [www.kristianstad.se/barnschema](http://www.kristianstad.se/barnschema). Aad bay muhiim u tahay in shaqaaluhu hayaan warbixinta ilamaha iyo wakhtiyada iskuulka ama fritidshem ka.